

## **Dhigashada jidadka Magaalada (Parking on City Streets, Somali)**

Magaalada Minneapolis waxaa ay leedahay wadooyin dheerarkoodu ka badan kun mile. Waxaa loogu talo galay in lagu wado gaadidka, caadi ahaan. Laakin marka ay meelo ka banaan yihiin wadooyinka---magaaladu waxay ay ogoolaataa baaburta in la dhigto qarka ama geeska wadooyinka.

Haddii aad aadaysid makhaayad ama dukaan, waxaad inta badan heli kartaa jidad banaan oo agagaarkaas u dhow oo la ogol yahay in la dhigto baaburta. Iyo marka aadan leehayn meelaha baaburta la dhigto oo guryaha khaaska u ah ama meelaha baaburta la dhigto, waxaa sahlan in baaburta la dhigto wadooyinka la maro qarkooda.

Laakin ka hor inta aadan baaburka istaajin, waxaad fiirisaa calaamadaha ku tusi in aad dhigan kartid... iyo sacada aad dhigan kartid. Lama ogolo in baaburta la dhigto wadooyinka qaarkood...ama wadooyinka qaarkood waxaa la ogolaada oo keliya sacad kooban.

Bartamaha magaalada (downtown), qeybta magaalada ee uptown, iyo qeybaha kale ee magaalada waxaad ku arki qalabka lacagta lagu guro ee birta ee baabur dhigashada boos kastana wuxuu leeyahay tiro u khaas ah.

Marka aad lacagta dhigashada bixin, tirada booska aad baaburka dhigatay geli mid ka mid ah qalabka lacagta lagu guro. Ka dib marka aad tirada gelisid, qalabka lacagta lagu guro ayaa ku sheegi doono qiimaha lacagta aad bixin ee baabur dhigashada. Waxaad doorataa wakhtiga aa doonaysid in aad baaburka dhigato. Lacagta aad isticmaali kartid waa 25 senti (rubuc dollar), hal dolaar, ama labo dolaar.

Meelaha qaarkood ee baaburta la dhigto, lama ogolo in baaburta la dhigto saacadaha qaarkood. Qalabka lacagta lagu guro wuxuu ku ogolaanayaa oo \*keliya\* in aad lacagta bixiso wakhtiga la ogol yahay dhigashada baaburto. Ma dhigan kartid booska wax ka badan saacadda loogu talo galay in la dhigto.

Marka aad lacagta booska bixin, waxaad isticmaali kartaa kaarka daynta ee sida Visa ama Master Kaar, rubuc dollar, ama qadaadic dollar ah. Xusuuso oo riix batanka daabaca warqada qaado warqada caddaynta. Warqada caddayntu waxa ay leedahay tiro ku tusi booska aad dhigatay...iyo waxay ay ku tusi saacadda dhigashadu marka ay dhamaan.

Xaafadaha qaarkood ee magaalada, waxaad ku arki oo kale hal boos oo qura oo qalabka lacagta la guro ah. Waxaad isticmaali kartaa rubuc dollar iyo qadaadic dollar ah. Meelaha qaarkood waxaad isticmaali kartaa kaararka daynta.

Si aad u heshid warbixin dheerad ah oo ku saabsan qalabka lacagta lagu guro ee baabur dhigashada...meelaha ay ku yaalin, iyo sida loo isticmaalo...waxaad booqataa boga inter-netka ee magaalada Minneapolis.